Somali

[Astaanta degmada] **DEGMADA TRONDHEIM**

# U kala wareegga xannaanada carruurta iyo dugsiga iyo SFO-ga

[Illustrasjon]

# TUSMO

Hordac………………………………………………………………………………………... 3
Aasaaska arrinta………………………………………………………………………… 5
Hadafka laga leeyahay qorshahan………………………………………………………… 6
Ku xididdaysad…………………………………………………………………………….. 7
Habraacyada ukala wareegga xannaanada carruurta iyo dugsiga hoose……………………. 11
Qorshe-sanadeed………………………………………………………………………. 12
Lifaaq……………………………………………………………………………………….. 13
Tixraacyada aqooneed/daraasado.....………………………………………………………. 19
Kooxda shaqada.…………………………………………………………………………. 17

# Hordhac

Degmadan ayaa leh mas'uuliyadda weyn ee in carruurtu hesho u kala wareeg wacan oo ay xannaanada carruurta iyo uga wareegaan dugsiga hoose, waxayna dejisaa shuruudaha wadashaqaynta ee u dhexeeya xarumaha waxbarashada.

Xannaanada carruurta iyo dugsiguba waa xarumo waxbarasho oo lagu helo daryeel, barbaarin iyo waxbarasho. Waa xarumo waxbaris-barbaarineed kala leh xilal kala duwan, laakiinse labaduba wax u tara bilaabista nolol wacan iyo waxbarasho socota inta la noolyahay. Dukumintigan waxaa isna ku jira SFO-ga dugsiga ka xarun ahaan.

Aqoonta aasaasiga ah ee uu ilmuhu ku barto xannaanada carruurta waxay macne weyn ugu fadhidaa maqsuudnimada ilmaha iyo ka faa'iidaysigiisa waxbarashada dugsiga. Daraasad ayaa muujisay in waxbarashadu ay tahay habraac isxoojiya, taas awgeedna ay muhim tahay in xoogga la saaro waxa uu ilmuhu ku fiicanyahay iyo adkaantiisa. Sidaas ayay xannaanada carruurtu ku noqonaysaa qayb muhim ka ah geeddiga waxbarashada ilmaha.

Waalidiinta/mas'uuliyiinta ayaa leh mas'uuliyadda weyn ee tarbiyeynta iyo barbaarinta ilmaha. Waalidiinta, xannanada carruurta iyo dugsigu waxay wadaagaan mas'uuliyadda in ilmuhu isagoo ku faraxsan dugsiga yimaado oo waxbarashadana raba.

Carruurta iyo waalidkuba waa inay ku kalsoonaadaan in xannaanada iyo dugsiguba ay aad ugu dadaalayaan in ay u abuuraan waxbarasho xiriirsan oo is waafaqsan, iyo in ilmaha loo hubiyo kala wareegis wanaagsan oo uu xannaanada carruurta uga wareego dugsiga. Arrintani waxay u baahantahay wadashaqayn joogto ah oo ka dhexaysa xannaanada carruurta iyo waalidiinta, iyo mid ka dhexaysa shaqaalaha xannaanada iyo kuwa dugsiga. Waa muhim in ilmuhu uu talo ku yeesho oo qayb ka ahaado shaqadaas.

Degmadan Trondheim waa degmo luuqadeed iyo cilmi-sayneed, taas awgeedna waxay kasbatay aqoon iyo khibrad ah isticmaalista https://sprakloyper.uis.no. Iyadoo taas lagu salaynayo waxaa la go'aamiyey in dhammaan xannaanooyinka iyo dugsiyada degmadu ay isticmaalaan https://sprakloyper.uis.no kolka ay ku hawllan yihiin u kala wareegista xannaanada/dugsiga.

Qorshahani wuxuu khuseeyaa carruur oo dhan, carruurta qabta baahiyaha gaarka ah sida ku qoran Xeerka xannaanada carruurta cutubka shan A, waxaa dheeraad u ah oo la suubinayaa habraacyada shaqo ee ku yaalla buugga Håndbok i Spesialpedagogisk arbeid (Buugga wax-qabadka  waxbaris-barbaarinta khaaska ah).

**Oggolaanshaha waalidka**
Jaangooyada (Rammeplanen) cutubka 6 ayaa ka hadlaysa "Overganger" (Kala wareegga).

Xannaanada carruurta oo kaashanaysa waalidiinta iyo dugsiga ayaa diyaarinaysa in carruurtu hesho u kala wareeg wacan oo ay xannanada uga wareegayaan dugsiga iyo haddii la garto loo qorsheeyo xilli firaaqo, lana caddeeyo in xannaanadu ay rabto in waalidiintu ay oggolaadaan in macluumaadka ilmaha ay siiso dugsiga. Macluumaadkaasi waa inuu ahaado mid marwalba ay ku jirto danta anfacaysa ilmaha. Dhinacyada kale ee ka qaybqaadanaya kala wareegga waa rugta caafimaadka carruurta iyo adeegga caafimaadka dugsiga.

Xannaanooyinka carruurta ee degmadu Meldeboka (Buugga war isweydaarsiga) ayay oggolaanshaha isticmaalayaan, dhinacyada kale waxay isticmaali karaan foomka lifaaqa ah.

Trondheim, 15.08.2018

[Saxiix]
Camilla Trud Nereid
Agaasimaha Waxbarashada iyo Barbaarinta

# Aasaaska arrinta

Jaangooyada (Rammeplan) waxqabadka xannaanada carruurta iyo waxa ay ka koobantahay waxay gogoldhig u tahay sida ay xannaanadu, iyadoo kaashanaysa waalidiinta iyo dugsiga, u diyaarin lahayd in carruurtu ay hesho kala wareeg kalsooni leh oo wanaagsan kolka ay xannaanada uga wareegayaan dugsiga iyo haddii loo garto barnaamijka casharrada ka dib (skolefritidsordning) [Jaangooyada, cutubka 3].

Carruurta ugu yaryar dugsiga waxay ciyaartu lagama maarmaan u tahay maqsuudnimada iyo horumarkooda, waxayse kaloo ciyaartu, kolka la eego waxbarashada idil ahaanteed, keentaa fursado waxbarasho oo wax hindisid iyo macne leh (Læreplanens overordnet del - verdier og prinsipper for grunnopplæring) [Manhajka qodobbadiisa madaxda ah - qayimka iyo mabaadiida waxbarashada aasaasiga ah].

Waxaa qumman in xannaanada iyo dugsigu ay is weydaarsadaan khibradaha iyo wararka, kuwaasoo jaanqaad u ah in laysu kaashado deeqda la siinayo carruurta ugu da’da weyn carruurta xannaanada, wareejintooda iyo dugsi bilaabistooda. (Jaangooyada cutubka 6].

Degmadan Trondheim waxaa jira 56 xannaano oo ay degmadu leedahay iyo 80 xannaano oo birifaati ah, kuwaas oo carruurta u wareejiya 41 dugsi-hoosaadyo ay degmada leedahay iyo 4 dugsi birifaati oo ay degmadu kabto. Waxaa kaloo iyana jira xannaanooyin qoys maamulo (familiebarnehager) oo carruurta u gudbiya dugsiyada. Waxaa la rabaa in xannaanooyinka iyo dugsiyada magaaladani ay si isku mid ah ugu dhaqmaan wareejinta, taasina waxay carruurta siinaysa fursado siman oo ah dugsi bilaabis guuleysata.

Sharciyeenta waajibka iskaashi ee mulkiilayaasha xannannooyinka iyo dugsiyada. Waajibku wuxuu meel ku hubsanyaa in carruurta kulligood ay helaan kala wareegis kalsooni leh oo wacan oo ay xannaanada uga wareegaan dugsiga. Wuxuu kaloo waajibku gacan ka geystaa in dhammaan xannaanooyinku, kuwa degmada iyo kuwa aanay degmadu lahaynba, ay heshiis iskaashi la galaan dugsiga, wixii ku saabsan u kala wareegga ilmaha ee xannaanada carruurta iyo dugsiga.

# Hadafka laga leeyahay qorshahan

Si loo tixgeliyo oo carruurtana loogu diyaariyo mustaqbalkooda, waa in xannaanadu ay aqoon u leedahay xaqiiqada ay carruurtu kala kulmayso dugsiga. Si loo tixgeliyo waqtigii carruurtu soo martay, waa inuu dugsigu aqoon u leeyahay khibradda ay carruurtu ka wadato xannaanada. (Brostrøm, 2009, waxaa lagu timaamay joornaalka majalladda Tidsskrift for nordisk barnehageforskning, 2014, bogga 20).

Daraasado dhawr ah ayaa muujiyey in shaqaalaha kala heerka ah ee u taagan nolosha wax-barasho ee ilmaha, ay aad u yartahay aqoonta ay iyagu isu leeyihiin, xiriirkooduna badi uu leeyahay god daloolooyin badan, qorshana aanu lahayn (Rambøl, 2010; Brostøm, 2009).

Mashruuc daraasadeed laga suubiyey Midowga Yurub wuxuu muujiyey in kala wareeg wacan uu kalsoonida ilmaha macne weyn u leeyahay oo uu dugsi ka hariddana baajiyo.

Mashruuc la wadaagaa wuxuu keenaa fursado lays kula shaqeeyo iyo in si wadajir ah loo wacnaysiiyo shaqada laga wado xannaanooyinka iyo dugsiyada aaggakan.

Hadafka laga leeyahay qorshahan waa in carruurta degmadan Trondheim kulli ay hesho kala wareegis kalsooni leh oo wacan oo ay u kala wareegto xannaanada iyo dugsiga.

***Dugsigu waa inuu meel ku hubsado in waxbarashada ilmuhu ay xiriir tahay iyadoo la tixgelinayo waxa ay carruurtu ku soo baratay xannaanada iyo waayo aragnimada ilmaha.***

Muhimadda ay leedahay isku xirnaanta waxbarashada labada meelood waxaa lagu caddayn karaa misaalkan hoose ee Språkbroen (Buundada luuqadda), waxaana laga soo qaatay https://sprakloyper.uis.no, xirmada u kala wareegista xannaanada/dugsiga.

**Buundaa luuqadda**

[Illustrasjon]

ka wareegista xannaanada carruurta — u wareegista dugsiga

Dhawaaqyada luuqadda — Xaraf

Higaad eray — Higaad eray

Eray — Eray

Jumlad — Jumlad

Hadal — Qoraal

Ujeedadda laga leeyahay qorshahan waa in meel lagu hubsado:

- in si macne leh laysugu xiro waxbarashada sannadka ugu danbeeya xannanada iyo tan sannadka hore ee dugsiga.
- habraacyo wacan oo wadashaqayn ah oo u dhexeeya xannaanooyinka iyo dugsiyada degmadan Trondheim.

Qorshuhu wuxuu jaantus u yahay kuna waajibay dhammaan xannaanooyinka iyo dugsiyada degmada ee degmadan Trondheim. Xannaanooyinka iyo dugsiyada birifaatiga ah waxaa lagu boorinayaa inay qorshahan raacaan.

# Forankring (Ku xididaysad)

Aragtida guud ee waxbarashada xannaanada carruurta iyo dugsiga:
Manhajka (dugsiga) iyo Jaangooyada (xanaanada) waxay labaduba ku dhisanyihiin aragtida dhaqan-bulsheed ee barbaarinta iyo waxbarashada. Aragtida waxbarashada ee dhaqan-bulsheedku waxay ku dhisantahay fikirka ah in waxbarashadu ku timaado adeegsiga luuqad-da iyo ka qaybgalka isla macaamilka bulshannimo. Aragtidaas waxay ka timi John Dewey, Georg Mead, Lev Vygotsky iyo Mikhail Bakhtin. Dewey wuxuu rumaysnaa in aqoonta lagu kasbado isla falgalka lala yeesho dadka kale. Wuxuu caan ku yahay oraahdiisa “Learning by doing and reflection” taasoo macnaheedu yahay waxbarasho waxay ka timaadaa wax suubin-ta iyo ku waayo arkidda. Aragtida waxbarasho ee dhaqan-bulsheedku macnaheedu waa aragti is bedbedasha oo waxbarasho, taasoo aanay jirin hal xaqiiqo. Aqoontu waxay ku xirantahay dhaqanka bulshada inagu ka midka nahay, inta aynu noollahayna waxbaynu baranaa.

Xeer khuseeya jaangooyada xannaanada carruurtu waxa ay ka koobantahay iyo shaqadeeda (2017) qodobka 6.1: Kala wareegga (Overganger).

“Waa in xannaanada carruurta oo kaashanaysa waalidiinta iyo dugsiga ay diyaariso in carruurtu hesho kala wareeg kalsooni leh oo wanaagsan kolka ay xannaanada uga waree-gayaan dugsiga, iyo haddii la garto barnaamijka casharrada ka dib (skolefritidsordning). Waxaa qumman in xannaanada iyo dugsigu ay isweydaarsadaan aqoonta iyo wararka kuwaa-soo laga jaanqaadayo iskaashiga daaran deeqda loo fidiyo carruurta ugu da’da weyn xannaa-nada carruurta, iyo dugsiga u wareejintooda iyo bilaabistooda. Waa in xannaanadu ay oggo-laansho ka haysato waalidiinta si ay warka ilmaha ku saabsan ugu gudbiso dugsiga .

Carruurta waaweyni waa inay hesho fursad ay ku farxaan inay dugsiga bilaabayaan oo ay dareemaan in xannaanada iyo dugsigu isku xiranyihiin. Xannaanadu waa inay diyaariso in carruurta waaweyni leedahay khibradda, aqoonta iyo xirfadaha iyaga siin kara aasaas wacan iyo inay xiiseeyaan dugsiga bilaabista. Xannaanadu waa inay wax ka qabato in carruurtu ay si fiican u afjarto waqtigii xannaanada carruurta, oo dugsiga ku aaddo xiiso iyo kalsooni ay ku qabaan awoodahooda. Carruurtu waa in la ogeysiiyo waxa ka socda dugsiga iyo barnaamijka casharrada ka dib.” (Jaangooyo, 2017).

Wareegtada Manaahiijta Kunnskapsløftet ee Agaasinka waxbarashada: Manaahiijta.

“Wadashaqayn wacan oo nidaamsan oo u dhexaysa xannaanada carruurta iyo dugsiga hoose, dugsiga hoose iyo dugsiga dhexe, dugsiga dhexe iyo dugsiga sare waxay wax ka taraysaa inay sahlanaato ukala wareegista maraxaladahaa kala duwan ee waxbarashada.”

Faqradaha yoolasha xannaanada (Xeerka xannaanada carruurta §1) iyo dugsiga (Xeerka waxbarashada § 1-1) waxaa ka muuqada meelo badan oo ay isaga mid yihiin, kuwaasoo hoos ku qoran. Tani waxay jaanqaad wacan u tahay in xannaanada iyo dugsigu ay leeyihiin yoolal isku mid ah oo ay ugu hawlgelayaan danta ugu wanaagsan ilmaha.

| **Faqradda yoolasha xannaanada** | **Faqradda yoolasha dugsiga** |
|---|---|
| Waa in xannaanada carruurta oo qoyska la leh iskaashi iyo isfahan ay daryeesho baahida ay carruurtu u qabto daryeel iyo ciyaar, oo kor u qaaddo waxbarashada iyo barbaarinta, kuwaas oo gogoldhig u ah horumar dhinac walba ah. Xannaanada carruurtu waa inay ku dhisantahay qayimka aasaaska u ah kiristanka iyo fikirka dhaxalka ah ee dadnimada (humanistisk arv) iyo hiddaha, sida xushmaynta qiimaha aadanaha iyo bey’adda, xoriyadda fikirka, dad u naxarii- sadka, iscafinta, sinnaanta iyo wadajirka, qayimka ka yimaada diimaha iyo caqiidoo- yinka kala duwan, kuwaasoo ku qotoma xuquuqda aadanaha.<br><br>Carruurtu waa inay barato farxadda wax suubinta (skapergelde), wax ka fekerista (undring) iyo xiisaha wax ogaanshaha (utforskertrang). Ha bartaan inay daryeelaan laftooda, iyaga dhexdooda iyo bey’adda. Carruurtu waa inay barato aqoonta iyo xirfadaha aasaasiga ah. Waa inay helaan xaqa ay u leeyhiin talo ku yeelasho hadba da’da ay jiraan iyo shuruudahooda. Xannaanadu waa inay carruurta ku qaabisho kalsooni iyo xushmo, oo u qiraan qayimkooda carruurnimo. Xannaanadu waa inay gacan ka geysato maqsuudnimada iyo farxadda xilliga ciyaarta iyo waxbarashada, waana inay ahaato meel istijaabin iyo kalooni u leh wadajirnimo iyo saaxiibtinimo. Xannaanadu waa inay horumariso dimuqraadiyadda iyo sinnaanta kana hortagto nooc walba oo takoor ah. | Waxbarashada dugsiga iyo tan shirkadaha lagu barto (lærebedrift), oo qoyska la leh iskaashi iyo isfahan, waxay iridaha u furaysaa dunida iyo mustaqbalka, waxayna ardayda caadiga ah iyo kuwa xirfad barashada ku jira siisaa fahan taariikheed iyo dhaqameed buuxa oo ku xididaystaan (forankring).<br><br>Waxbarashadu waa inay ku dhisnaato qayimka aasaaska u ah kirisitanka iyo fikirka dhaxalka ah ee dadnimada iyo hiddaha, sida xushmaynta qiimaha aadanaha iyo bey’adda, xoriyadda fikirka, dad u naxariisadka, iscafinta, sinnaanta iyo wadajirka, qayimka ka yimaada diimaha iyo caqiidooyinka kala duwan, kuwaasoo ku qotoma xuquuqda aadanaha.<br><br>Waxbarashadu waa inay wax u tarto in la balaarsado aqoonta iyo fahmista dhaqanka aynu dhaxalnay ee dalka iyo hidda dhaqameedka aynu la wadaagno dalalka.<br><br>Waxbarashadu waa inay daaha ka feyddo kala duwanaanta dhaqammada, xushmana u muujiso qofku waxa uu aaminsanyahay. Waxbarashadu waa inay horumariso dimuqraadiyadda, sinnaanta iyo fikirka ku dhisan cilmi sayniska.<br><br>Ardayda caadiga ah iyo kuwa xirfad barashada ku jira waa inay bartaan aqoon, xirfad iyo aragtiyo say uga adkaadaan noloshooda, oo uga qaybgalaan shaqada iyo wadajirnimada bulshada. Waa inay bartaan farxadda wax suubinta (skaperglede), wax danayn iyo xiisaha wax ogaanshaha (utfor- |

| | |
|---|---|
| | skertrang).<br><br>Ardayda caadiga ah iyo kuwa xirfad bara-sho ku jira waa inay bartaan inay u fekeraan si faaqidaad leh, waxnu u suubiyaan iyagoo dareen u leh anshaxa wacan iyo bey'adda. Waa inay mas'uuliyadda wax ku lahaadaan, xaqna waxay u leeyihiin talo ku darsad.<br><br>Dugsiga iyo shirkadaha tababbarka lagu qaataa waa inay ardayda caadiga ah iyo kuwa tabbabarka ku jira ay ku qaabilaan kalsooni, xushmo iyo wax ka dalab (krav), iyagana siiyaan dalabyo horumarinaya barbaarinta iyo rabitaan waxbarasho. Waa in laga hortago nooc kasta oo takoor ah. |

Carruurtu kolka ay ciyaarayso siyaabo kala duwan ayay fikirkooda u gudbiyaan, ciyaartuna waxay xannaanada carruurta ka tahay wax dabiici ah oo muhim ah. Ciyaartu macne ayay u leedahay maqsuudnimada carruurta, waana qaab nololeed iyo waxbarsho oo aasaasi ah. Carruurtu waa inay xannaanada ku helaan ciyaar, waana wax iyaga ku abuuran, waxayna gogoldhig u tahay waxbarasho iyo horumar dhinac walba ah. Carruurtu waa inay darsaan waxa ku xeeran, oo raadsato wax ogaansho oo hesho waayo aragnimo. Farxadda wax suubinta, wax darsidda iyo xiisaha wax ogaanshaha waa qodobbo muhim u ah ciyaarta iyo waxbarashada carruurta.

Wadajirnimada xannaanada carruurtu waa madal waxbarasho oo muhim ah, saaxiibtinimaduna waxay aasaas u tahay wadajirnimo wacan, waxaana ku kobca rabitaanka waxbarashada. Xannaanada carruurtu waa inay abuurto wadajirnimo lagu raadsan karo laguna samaysan karo saaxiibtinimo. "U kala wareegista xannaanada carruurta iyo dugsiga waa in ilmuhu uu yimaado dugsi diyaarsan, oo diyaar u ah inuu halkaa ka sii wado wixii ay xannaanadu soo dhistay." (Meld. st.21). Taas darteed waa in dugsigu u shaqeeyo si waxbarashada maaddooyinka iyo tan bulshannimada labaduba ay isula socdaan oo isula horumaraan. Dugsigu wuxuu u xilsaaran yahay inuu ardaydu u saamaxo inay la yimaadaan farxadda wax suubinta, wax danaynta iyo xiisaha wax ogaanshaha, oo u saamaxo inay helaan waayo aragnimo ay ku arkoodaan fursado, fikradahoodana ay u beddelaan ficil.

U kala wareegista xannaanada/dugsiga waa in loo arko habraac taxan oo aan loo arag dhacdo midba gooni tahay. Kala wareeggu wuxuu carruurta u keenaa isbedel caqli iyo mid meeleed labadaba, waxayna samaystaan xiriiro cusub oo ka dhacaya aag cusub, iyagoo isla markaa ka wareegaya carruur xannaano oo noqonaya arday, oo aqoontooda bulshanimo iyo caqliguba u kobcayo qaab la jaanqaadaya dhaqanka dugsiga iyo habka uu u shaqeeyo. Carruurtu waxay u baahantahay inay arkaan in xiriir ka dhexeeyo wixii xannaanada carruurta ka jiray iyo waxa dugsiga ka jira. Ilmuhu waa inuu si toos ah iyo si dadbanba qayb ka yahay xiriirka iskaashi ee isaga ku gadaaman. Waxaa loo baahanyahay in la suubiyo waxqabadyo iskaashi ah oo la qabto xilliga danbe ee xannaanada carruurta iyo xilliga hore ee dugsiga, kuwaasoo mideeya

qaababka looga shaqeeyo labadaa xarumo waxbarasho. (Xarunta aqoonta ee waxbarashada; Waxqabadyada saamaynta wacan ku leh u kala wareegista carruurta ee xannaanada iyo dugsiga - aqoon-dhugasho nidaamsan, waxaa qoray Lillejord, S., Børte, K., Halvordsrud, K., Ruud, E. & Freyr, T)

Hogsnes iyo Moser waxay baaritaankooda ku iftiimiyeen macnaha ay uu kala wareegistu leeyahay: Fahmista u kala wareeg qumman iyo in la garto xiriirka ka dhexeeya xannaanada, dugsiga iyo barnaamijka casharrada ka dib.

**Macnaha ay leedahay luuqad barashadu**

In la isku xiriirsho ciyaarta iyo waxbarashada, carruurtana loo saamaxo inay wax darsaan, oo aqoonta iyo luuqadda ku horumaraan iyagoo ciyaaraya, ayaa ka mid ah waxyaalaha ay daraasaddu ku tilmaantay inay yihiin hab wanaagsan oo lagu daryeelo carruurta, kolka ay xannaanada uga wareegayaan dugsiga. Ciyaarta iyo det estetiske (la falgalista waxa qofka ku xeeran) ayaa xuddun u ah kala wareegga (Corsaro & Molinari, 2000).

Språkløyper waa istaraatijiyo qaran oo khusaysa luuqadda, akhritaanka iyo qoritaanka, waxaana bilowday Wasaaradda wabarashada. Rugta akhriska, Lesesenteret (Uis) iyo rugta qoraalka, Skrivesenteret (NTNU) ayaa ka mas'uul ah inay maamulaan oo soo sameeyaan waxa la baranayo ee ku jira xirmooyinka kor u qaadista aqoonta, waxayna ku kaydsan yihiin bogga internetka ee sprakloyper.no. Skrivesenteret ayaa hormuud ka ah soo diyaarinta xirmada kor u qaadista aqoonta ee u kala wareegga xannaanada iyo dugsiga. Aagagga ugu muhimsan xirmadan waa: wadashaqayn, kulanka dhaqamada, barashada luuqadda, u kuurgelitaano iyo aragtida afaf badnida (flerspråklige perspektivet).

Språkløyper - u kala wareegga xannaanada/dugsiga.

Sawirka hoose waxaa laga soo qaatay Språkløyper.no wuxuuna tusayaa mas'uuliyadda iyo waxqabadyada dulsaaran kooxaha kala duwan. Shaqada kala wareejintu waa inay u dhacdo sida ay falaaraha jiifaa tilmaamayaan, oo isla markaana ka koobnaato wadashaqayn dhexmarta heer degmo, heer hoggaamiye iyo heer macallin.

[Trekant figur]

Mulkiilaha xannaanada
iyo dugiga

Qorshayaal
Awoodaha (ressurser)
Hawl bilaabista

Maamulaha
xannaanada

Maamulaha
dugsiga

Hirgelinta
Ka warhayn

Hoggaamiyaha waxbaris-
barbaarinta

Macallimiinta

Soo diyaarinta
Fulinta
Qiimayn
Sii wanaajin

# Habraacayada u kala wareegga xannaanada carruurta iyo dugsiga hoose

---

Habraacyada u kala wareegga xannaanada iyo dugsigu waxay ka jaanqaadaan labo shuruudood oo muhim ah:

- Wadashaqaynta hore ee uu dugsiga la lahaa waalidka iyo xannaanada carruurta
- Grenseobjekter (Arrimo ka wadajira xannaanada iyo dugsiga)

Dugsiyadan Trondheim waxay carruurta ka qaabilaan xannaanooyin badan. Si carruurta oo dhan iyo qoysasku u helaan isku shuruudo ah dugsi bilaabis wacan, waxaa muhim ah in la diyaariyo madal iskaashi oo daaran waxyaalaha la suubiyo kala wareegista. Taa waxaa lagu qeexaa waxaqabdyo ah isbarasho (kulamo dhaqameed), war isweydaarsi (wadashaqayn), iyo luuqad barasho. Kulanka ugu horreeya ee rasmiga ah ee u dhexeeya waalidka, xannaanada iyo dugsiga waxaa qabanqaabinaya dugsiga, ula jeeddadiisuna waa in la kala caddeeyo waxyaalaha ay dhinacyadu kala filanayaan.

**Grenseobjekter (Arrimo ka wadajira xannaanada iyo dugsiga)**

Grenseobjekter waxay ka jiraan meelo badan oo kala duwan, waana waxyaalo ay carruurtu goob kasta ku garanayso, wayna u fududdahay inay fahmaan oo isticmaalaan. (Akkerman & Bakker, 2011. Star & Griesember, 1989). Grenseobjekter waxay carruurta siin karaan fursado ay si firfircoon uga qaybgalaan barashada isku xirnaanta arrimaha.

Grenseobjekter waxay noqon karaan walxo, ciyaaro nidaamsan ama dheelo, kuwaasoo ay carruurtu  ka hesho xannaanada carruurta iyo dugsiga hoose labadaba. Degamadan Trondheim waa in xannaanooyinka iyo dugsiyadu kulligood ay carruurta baraan hal buug, hal dheel, hal ciyaar iyo hal hees. In degmadu adeegsato Grenseobjekter la wadaago waxay kor u qaadaysaa suuragalnimada in carruurtu aragto islahaanta iyo isku xirnaanta xannaanada carruurta iyo dugsiga.

Maantadan 01.08.2018 waxaa jira grenseobjekter-yada soo socda:
Buug: Waxartii tirin kartay ilaa toban (Geitekilling som kunne telle til ti).
Dheel: Villkatten (Mukulaashii/bisaddi duurka).
Ciyaar: Rødt lys (Nal guduudan/cas).
Hees: Jooji! Ha dhibin!

Grenseobjekter waxaa is afgarad dhexdooda ah ku beddelan kara xannaanada iyo dugsiga/SFO-ga, kolka shirar-xaafadeedka looga hadlayo waxqabadka/waxabaris-barbaarinta bilaha sibtembar/oktoobar.

Shaqadaas grenseobjekter waa inay waafaqsantahay jaangooyada cutubkeeda 1, 3 iyo 9, si iyana loo waafaqsiiyo qodobbada madaxda ah - qayimka iyo mabaadiida waxbarashada aasaasiga, cutubka 1 iyo 2.

Forskning.no

# Qorshaha sannadka

| Goor (qiy.) | Habraac | Mas'uul | Waxqabadka kala wareegga |
|---|---|---|---|
| Ogosto | Xannaanada iyo dugsiga ayaa bilaabaya ku shaqaynta xirmada kala wareegga ee Språkløyper | Maamulaha xann./ macallinka xann./ maamulaha dugsiga/ macallimiinta | Luuqad barasho |
| Ogosto | Laanta waxbarashada ayaa dugsiyada u diri liiska dugsi bilaabayaasha sanadka soo socda inta ay soo heli karaan | Laanta waxbarashada | Iskaashi/ war isa siin |
| Sibtembar | Xannaanada ayaa diyaarin dugsi bilaabayaasha afaf kale ku hadla (talooyin ku qoran warbixinta "luuqad kale ku hadleyaal dugsi diyaar u ah" | Maamule xann./ macallinka xan. | Luuqad barasho/ Diyaarin |
| Sibtembar-oktoobar | Shir aqooneed/waxbaris-barbaarineed dhexmara xannaanada iyo dugsiga xaafadda | Maamulaha degmada | Dhaqan |
| | Waxaa la samaynayn qorshe hoosaad iskaashi u kala wareegga xannaanada./dugsiga | | |
| | Shir wadareed dhexmara dugsiga, SFO, waalidka iyo shaqaalaha xannaanada kaasoo lagu falanqeeyo waxa dhinacyadu kala filanayaan | Maamulaha dugsiga | Dhaqan |
| Oktobar-nofembar | Wadahadallo lala yeesho ilmaha iyo waalidka kuwaas oo lagu falanqeeyo waxa la filayo sanadka u danbeeya xannaanada iyo dugsi bilaabista | Xannaanada | Iskaashi/ war isa siin |
| Nofembar | Dugsiga ayaa dugsi bilaabayaasha sanadkan iyo safka 1aad ilaa 4aad ku casuumaya kulan fadhi | Maamulaha dugsiga | Dhaqan |
| Janaayo-febraayo | Carruurtu ayaa booqan dugsiga ay bilaabayaan si ay usii bartaan barxadda dugsiga | Xannaanada | Dhaqan |
| Febraayo | Dugsi qoris, la booqanayo aagga SFO-ga. Taariikh loo ballamo oo lagu qoro xannaanada iyo dugsiga. | Maamulaha dugsiga | |
| Febraayo-maarso | Wadahadal dhexmara ilmaha, waalidka iyo macallinka xann. kaasoo ilmuhu bandhigayo "Waa i kan". Ballan ah macluumaad wareejin | Xannaanada | Iskaashi/ war isa siin |
| Maarso-Abriil | Waxaa bilaabmaya shirarka u dhexeeya xannaanada iyo dugsiga/SFO-ga, dugsiga waxaa la siinayaa nuqul ah "Waa i kan" | Maamulaha | Iskaashi/ war isa siin/ u kuurgal |
| Abriil | Dugsiga/SFO-ga ayaa booqad ku casuumaya waalidiinta iyo ubadka (maalmaha isbarashada) | Maamulaha/ Hoggamiye SFO | Iskaashi/ war isa siin |
| Maajo | Carruurta xannaanada ayaa la kulmaya carruurta hore usoo martay kala wareegga iyo dugsi bilaabista (danjirayaasha dugsiga, abbaanno) | SFO/dugsiga oo kaashanaya xannaanada | |

U diyaarinta bey'ad waxabarsho, mid jireed iyo mid maskaxeedba, ee carruurta baahiyaha gaarka ah qabta, sida ku dhigan Xeerka xannanada carruurta cutubkiisa shan A, waxay bilaabantaa labo sano ka hor dugsi-bilaabista. Ilmaha xannaanadu boos ayuu ku leeyahay, wuxuu qabaa mas'uuliyadda inuu xiriir la samaysto dugsiga isaga qaadanaya. Waa muhim in dhammaan shaqaalaha xannaanada iyo dugsiguba ay aqoon u leeyihiin sida gaarka ah ee ay carruurtaasi ugu nuglaan karto kala wareegga .

# Lifaaq

DEGMADA TRONDHEIM

# WAA I KAN

[Firkant]

**Waxaan jeclahay inaan suubiyo**

**-** sawir ama qor

**[**Sirkel]

[Firkant]

## KANI WAA ANIGA

- musawir ama sawir

**Waxaan farxad ku sugayaa**

- sawir ama qor

[Firkant]

**Waxaan cabsi-xiisaynayaa**

- sawir ama qor

[Firkant]

**Waxaan kuwa dugsiga jooga ku oran**

- sawir ama qor

[Sirkel]

## KANI WAA QOYSKAYAGA

- musawir ama sawir

**FOOMKA 1**

Waalidka/mas'uulka ayaa buuxinaya

| |
|---|
| 1. Sifee ilmahaagu waxa uu ku fiicanyahay iyo waxa uu xiiseeyo: |
| 2. Sifee ilmahaaga aqoontiisa bulshannimo (saaxiibbo/ciyaar): |
| 3. Ma jiraan waxyaalo muhim ah inaad ilmahaaga nooga sheegtid ka hor inta aanu dugsiga bilaabin? (Haddii uu ilmuhu haysto qiimayn khabiir waa mas'uuliyadda xannaanada carruurta inay arrintaa warkeeda soo gudbiyaan.) |
| 4. Ka warbixi awoodda ilmaha ee isku fillaanshaha xagga dhar-gashiga, musqul aadista iyo waxyaalaha kale ee maalinta la suubiyo: |
| 5. Idinku ka waalid/mas'uul ahaan maxaad ka filaynaysaan dugsiga ama SFO-ga? |

Anigu/annagu waxaan oggolnahay in xannaanadu ay macluumaadka ku qoran foomkan u sii gudbiso dugsiga ________________________. Nuqul waxaa leh waalidka iyo faylka ilmaha.

Trondheim, ____________

______________________________________

Magaca waalidka/mas'uulka

**FOOMKA 2**

Foomka u kala wareejinta ilmaha ee xannaanada ______________ iyo dugsiga___________: Ujeedka foomkani waa in uu dugsigu helo macluumaadka uu u baahnayahay si ay u diyaari-yaan kala wareegis wacan oo dhexmara xannaanada iyo dugsiga. Waa in waalidiintu ay saxiixdo oggolaanshaha in foomka oo la buuxiyey loo diro dugsiga. Foomkan waxaa loogu talogalay dhammaan dugsi bilaabayaasha. Haddii uu ilmuhu qabo baahiyo gaar ah iyo/ama haddii loo baahanyahay caawimo waxbaris-barbaarineed khaas ah, habka la raacayaa wuxuu ku qoranyahay buugga << Håndbok i spesialpedagogisk arbeid>> ee degmada Trondheim.

Magaca ilmaha iyo taariikhda dhalasho:__________________________________________
Xannaanada carruurta:________________________________________________________

| |
|---|
| 1. Sifee dhinacyada uu ilmuhu ku fiicanyahay: |
| 2. Sifee waxyaalaha uu ilmuhu xiiseeyo: |
| 3. Sifee ilmaha habdhaqankiisa bulshannimo iyo astaamihiisa saaxiibtinimo (naxariista, iskaashiga, ismuujinta, is xakamaynta, mas’uuliyadda, awoodda dhibaato xallinta): |

| |
|---|
| 4. Ilmuhu ma qabaa baahiyo gaar ah oo muhim u ah in dugsiga ogaado? |
| 5. Ka warbixi awoodda ilmaha ee isku fillaanshaha xagga dhar-gashiga, musqul aadista iyo waxyaalaha kale ee maalinta la suubiyo: |

Anigu/annagu waxaan oggolnahay in xannaanadu ay macluumaadka ku qoran foomkan u sii gudbiyaan dugsiga ____________________. Nuqul waxaa leh waalidka iyo faylka ilmaha.

Trondheim, ___________

____________________________________

Magaca waalidka/mas'uulka

# Tixraac aqooneed/daraasad


- Kunnskapssenter for utdanning, 2015: Tiltak med positiv innvirkning på barns overgang fra barnehage til skole - En systematisk kunnskapsoversikt. ISBN 978-82-12-03458-7
- Språkløyper.no

# Kooxda shaqada

| | |
|---|---|
| Macallinka xannaanada, xannaanada SIT | Marianne Kjørkleiv Aune |
| Macallinka safka kowaad, dugsiga Ila | Jartrud Lindø |
| Hoggaamiyaha qaybta SFO, dugsiga Nardo | Roger Karlsen |
| Hoggaamiyaha qaybta SFO, dugsiga Stavset | Heidi Bjørnbet |
| La taliyaha waxbaris-barbaarinta, Lerkendal | Tone Merete Skogås |
| Maamulaha xannaanooyinka Nissekollen | Monica T. Svalby |
| Hoggamiyaha waxbarashada, xannaanada Sjetne | Grethe L. Endresen |
| Daladda waxbarashada | Berit Baar Lian/Tone Jøssund |
| Macallin, dugsiga Dagskolen | Elin Thue Wiig |
| La taliye, laanta waxbarashada iyo barbaarinta | Kristin Gudim |

Trondheim kommune
Rådmannen
Postboks 2300
7004 Trondheim

www.trondheim.kommune.no

m1448 . september 2018
Kommunikasjonsenhet